

Liiska Calaamadeynta ee Kahortaga Sunta aan sida ula kacda ah Loo Cunin

Barnaamijyada waxbarashada dhallaanka iyo Daryeelka ilmaha waxay u adeegsan karaan liisgaan calaamadeynta sida hagrid ka caawinaysa sida looga hortago sunta aan sida ula kacda ah loo cunin.



- Xarunta Dadka Sumooba ee Washington [boostada](#) ama lambarka taleefoonka 1 (800) 222 - 1222 si qaab waadix loogu arko.
- Bil walba tijaabi aaladaada carbon monoxide.

Alaabahaan dhig meelo aysan gaarin carruurtu:

- Alaabaha xubnaha shaqaalaha, sida boorsooyinka gacanta ama boorsooyinka dhabarka.** Alaabahaan waxaa kujiri kara waxyaabo ay ku sumoobi karaan carruurtu, sida waxyaabaha la isku qurxiyo, alaabaha loo adeegso nadaafada jirka, lacag qadaadiic ah, feetamiino, kaalmaatiyo, ama daawooyin.
- Boorsooyinka 'Lagu qaado Alaabaha' Degdega ah.** Boorsooyinka badan waxaa kujira daawooyinka nolasha la tacaala ee loogu talagalay carruurta ka diiwaangashan daryeelka.
- Dhalooyinka daawooyinka wax lagu nadiifiyo.**
- Agabyada nadaafada iyo alaabaha leh kiimikooyinka.** Dhig alaabahaan meel ammaan ah oo aysan kasoo dhici karin haddii dhul gariir dhaco.

Hubi aagaga meelaha qalabyada khatarta ah ama agabyada nadaafada lagu kaydiyo (qaanadaha, qolka dharka lagu dhaqo, jikada, iwm.)

- Agab kasta oo wax lagu nadiifiyo oo aan ka ahayn warankiilo waa inuu horey usoo oggolaaday ruqsad bixiye si loo isticmaalo.
- Si aad iskaga ilaaliso inaad abuurto hawo khatar ah, alaabaha leh **warankiilo waa inaan lagu kayd**in ama meel u dhaw:
 - **alaabaha leh maadada ammonia.** Marka ay isku darsamaan waxay abuuraan gaaska chloramine.
 - **khalka.** Marka ay isku darsamaan waxay abuuraan gaaska chlorine-ka.
- Kiimikooyinka iyo agabyada wax lagu nadiifiyo ku kaydi meel ka baxsan meelaha cuntadu taalo, aagaga aad cuntada ku kaysato, iyo agabyada loo adeegsado in cuntada lagu kariyo ama lagu cuno.
- Tuur alaabaha dhacay ama kiimikada aadan u isticmaalin waxyaabaha aad usoo gadatay.** Booqo [Webseedka Iska Fogeeynta Qashinka Khatarta ah ee King County](#) si aad u oggaato liiska alaabaha la aqbalo iyo goobaha lagu aruuriyo.
- Iska tuur agab kasta oo farshaxan oo aysan shirkada soo saartay ku qorin "ma lahan sun".
- Iskuday inaad saabuuntada weelasha lagu dhaqo, saabuunta gacmaha, iyo saabuunada dharka lagu dhaqo inaad ku badesho [alaabaha ah dookhyada badqabka ah ee ay ansixisay Environmental Protection Agency \(EPA, Hay'ada Ilaalinta Bii'ada\)](#).

Ka saar alaabahaan qolalka fasalka (waxay sababi karaan dhawaac haddii la laqo ama haddii la calaaliyo):

- Badhanada yaryar ee wata musbaarka, musbaarada meelaha wax lagula dhejiyo, birta qabatada, iyo qalabka leh magneetiga** ee yaala qolalka ay joogaan carruurta ka yar 3 sano.
- Cinjirada yaryar ee balaarta ama kubadaha (cinjira yaryar ee biyaha hoos ku wata).**
- Qalabka carruurtu ku ciyaaraan ee jajabay.** Xaqiiji in qalabka carruurtu ku ciyaaraan yihiin kuwo ku habboon da'da ilmaha iyo kobiciisa.